



Habka Mas'uul u noqoshada

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo dulmar guud oo ku saabsan mas'uuliyad u noqoshada ee Gobolka Washington. Waxaa loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho oo keliya mana beddeli karto la tallin sharci oo waafi ah. Wixii talo ah ee ku saabsan go'aannada sharci, fadlan la hadal qareen. Macluumaadkan ayaa isbadali doona sanadka 2022. Macluumaadkan wuxuu soconayaa sanadka 2021 oo kaliya.

Talaabooyinka Mas'uul unoqoshada

1. Tababar Loogu Talo Galay Ilaaliyaasha Aan Xirfad Lahayn (Lay)

Ka hor inta uu qof qoyska ka mid ah ama qof kale oo xirfadlayaal ah uusan codsan (fayl gareynta waraaqaha maxkamadda si aad u weydiisato) in maxkamaddu uu mas'uul kaa noqdo, isagu / iyadu waa inuu dhammaystiraa tababarka khadka tooska ah ee internetka.



Waxay ka kooban tahay waajibaadka mas'uuliyadda iyo mas'uuliyadaha, foomamka iyo jadwalka. Tababarku wuu sahlan yahay. Waxaad ku sameyn kartaa hal fadhi (qiyaastii laba saacadood) ama dhowr fadhi, adigoo ku socda xawaarahaaga.

Haddii aad dooratid inaad codsato masuuliyad kadib tababarka, hayso caddeynta dhammaystirka ee aad ka heshay tababarka si aad u tusto maxkamadda.

2. Codsiga Maxkamadda

Qof kasta oo raba mas'uul in uu noqdo qof kale waa inuu codsi ka fayl garaystaa Maxkamadda Sare. Codsigu wuxuu weydiisanayaa maxkamadda inay go'aamiso in qofka loo aqoonsaday codsigiisa naafo yahay, go'aamiso nooca wakiilnimo ee loo baahan yahay oo ku habboon, loona magacaabo mas'uul habboon.

Waa inaad ogeysiis ku saabsan codsashada mas'uuliyadda siisaa qofka ku cad codsiga iyo dhinacyada kale ee daneynaya. Waxaad ka heli kartaa foomamka codsashada mas'uuliyadda internetka <https://www.courts.wa.gov/forms/?fa=forms.static&staticID=14>.

3. Maxkamaddu Waxay Magacaawdaa wakiilka Mas'uulka Ad Litem

Marka codsi loo gudbiyo maxkamadda, maxkamaddu waxay magacaawdaa ilaaliye mas'uul si ay u baarto. Wakiilka soo cadeeynta waa inuu u sheegaa maxkamadda haddii mas'uulnimadu ay habboon tahay, yaa noqon kara mas'uulka, ama haddii ay jiraan doorar kale oo xaddidaad aan lahayn.

4. Maxkamaddu Waxay Qabataa Dhageysi

Dhageysigan, xubin qoyska ka mid ah ama kuwa kale ayaa diidi kara (ka doodi kara) codsiga mas'uulnimo. Haddii maxkamaddu u magacowdo codsadhaha mas'uul, codsadhaha ayaa helaya warqado in mas'uul laga noqdo ah.

5. Waraaqadaha Mas'uulnimada

Kani waa dukumiintiga rasmiga ah ee u oggolaanaya mas'uulka inuu ku hadlo magaca qofka. Waxay sidoo kale faafaahin ka bixinaysaa xayiraad kasta oo la saaray mas'uuliyadda.



Habka Mas'uul u noqoshada

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay in lagu bixiyo dulmar guud oo ku saabsan mas'uuliyad u noqoshada ee Gobolka Washington. Waxaa loogu talagalay ujeedooyin waxbarasho oo keliya mana beddeli karto la tallin sharci oo waafi ah. Wixii talo ah ee ku saabsan go'aannada sharci, fadlan la hadal qareen. Macluumaadkan ayaa isbadali doona sanadka 2022. Macluumaadkan wuxuu soconayaa sanadka 2021 oo kaliya.

Shuruudaha Warbixinta

U adeegidda sida mas'uulka qofka iyo / ama hantida waa shaqo badan. Waa inaad keydisaa diiwaanno dhameystiran si aad u taageerto wax kasta oo aad ku sameyso magaca qofka leh risiidhada ama diiwaanno kale. Warbixinnada waxaa la bixiyaa waqtiyada soo socda:



- ▶ **90 maalmood gudahood markii lagu magacaabay mas'uul ahaan**
- ▶ **Sannad kasta ugu yaraan hal bil ka hor inta aysan dhicin Warqadahaada Mas'uuliyadda**
- ▶ **30 maalmood gudahood markay dhacdooyinka qaarkood dhacaan**

Waa muhiim inaad ku soo gudbiso warbixinanadaada waqtiga loogu talagalay. Haddii aadan gudbin warbixinadaada waqtigii loogu talagalay, waxaad la kulmi kartaa ganaaxyo maxkamadeed, waxaad u baahan kartaa inaad ka soo muuqato dhageysiga maxkamadda, waxaana laga yaabaa inay maxkamadda kaa saarto adiga inaad noqoto mas'uul.

Nidaamyada warbixintu way ku kala duwan yihiin degmooyinku. Maxkamadaha qaarkood ayaa laga yaabaa inay kaa codsadaan inaad ka soo muuqato dhageysiga dib u eegista. Hubso inaad ogaatid shuruudahaaga gaarka ah ee warbixinta degmadaada.